

## **AMARKA FULLINTA EE LAMBARIKIISU YAHAY. 20-18**

### **KA ILAALINTA IN LACAGAHA DIB LOO SOO CELIYAY EE SHARCIGA CARES LA XAYIRO, SI MARKAA LACAGAHAAS LOOGU ISTICMAALO BAAHIYADA DARUURIGA AH**

Bishii Febraayo 28, 2020, waxaan magacaabay Kooxda Gurmadka Deg dega ah ee Fayraska Korona ee Gobolka Oregon.

29-kii bishii Febraayo 2020, Waaxda Adeegyada Aadanaha waxay soo saartay tilmaamo adag, oo xaddidey booqashada xarumaha daryeelka ee la iskugu imaaday, oo ay ku jiraan guryaha daryeelka.

2-dii bishii Maarso 2020, Barasaabka wuxuu diyaar gareeyay Xarunta Xiriirinta Xaalada Degdega.

8-dii Maarso 2020, waxaan soosaaray baaq xaalad degdeg ah anoo cuskanaya sharciga ORS 401.165 *iyoo qaybta ka dambaysa*. taasi oo ay ugu wacan tahay halista ku aaddan caafimaadka dadwaynaha ee caabuqa coronavirus (COVID-19).

Markay ahayd Maarso 12, 2020, waxaan mamnuucay isu imaatinka 250 qof ama in kabadan, waxaana ku dhawaaqay xiritaanka dhammaan dugsiyada K-12 ee gobolka Oregon laga bilaabo Maarso 16, 2020, ilaa Maarso 31, 2020.

Maarso 13, 2020, Madaxwaynaha Maraykanka ayaa ku dhawaaqay in COVID-19 yahay xaalad degdeg ah oo qaran.

Taariikhda markay ahayd Maarso 17, 2020, waxaan mamnuucay kulamada 25 qof ama dad ka badan, waxaan kaloo mamnuucay cunno ku cunida iyo wax ku cabida goobaha cuntada ee gobolka oo dhan, waxaana kordhiyay xiritaanada dugsiga oo waxaan gaarsiiyay illaa Abriil 28, 2020. Waxaan sidoo kale ku dhiirgeliyey dhamaan ganacsatada aysan mamnuucyadan khuseyn inay dhaqan geliyaan nidaamyada kala fogaanshaha bulshada.

Markay ahayd Maarso 18, 2020, waxaan hakiyay howlihii waxbarista ee shaqsigaa ahaa ee xarumaha waxbarashada sare ilaa Abriil 28, 2020.

Xiliga Maarso 22, 2020, waxaan ku soo rogay mamnuucid ku meelgaar ah oo ka guurinada deegaanka oo sabab la xiriirto kiro bixin la'aanta, mamnuucayo fullinta sharciga oo u adeegida, gaarsiinta, ama ku dhaqmayo ogeysiin walba, amarka ama amarka qoran ee ka joojinta kireysiga, la xiriirto ka guurinada deegaanka oo lacag bixin la'aan ah.

Xiliga Maarso 23, 2020, waxaan ku amray reer Oregon inay "Joogaan Guriga, Badbaadiyaan Nololo," ku hagayo shaqsiyaadka inay guriga joogaan illaa inta ugu badan oo suurtoogalka ah, ku amrayo xiritaanka ganacsiyada tafaariiqda la gaareeyay, u baahan tallaabooyinka kala fogaanshaha bulshada ee xarumaha bulshada kale iyo xarumaha gaarka ah, oo ku soo rogayo sharuudaha aagaga banaanka iyo xarumaha daryeelka carruurta shatiyeysan.

## **AMARKA FULLINTA EE LAMBARIKIISU YAHAY. 20-18 BOGGA LABO**

Abriil 1, 2020, waxaan soo rogay in si kumeel gaar ah loo hakiyo joojinta heshiisyada kirada iyo guryo ka saaridda dadka guryaha deggan marka ay lacag bixin waayaan, si loo hubiyo dadka inayna guryaha ka soo bixin ilaa inta ugu badan ee suurtoagal ah, iyo si loo hubiyo bixinta alaabta iyo adeegyada daruuriga ah inta xaaladdan degdegga ah lagu jiro.

Abriil 8, 2020, waxaan ku dhawaaqay in xiritaanada dugsiyada iyo hakinta hawlaha waxbarasho ee la isku imanayo ee macaahidda waxbarashada sare loo kordhin doono ilaa dhammaadka teeramka waxbarasho ee wakhtigan iyo sanad dugsiyeedka.

COVID-19 wuxuu keeni karaa cudur neefmareenka ku dhaca oo horseedaya xanuun halis ah ama dhimasho. Ururka Caafimaadka Adduunku wuxuu u tixgaliyey COVID-19 mid adduunka wada gaaray. COVID-19 wuxuu dadka isugu gudbaa qufaca, hindhisada, istaabashada, oo ay ku jirto taabashada meel fayraska leh kadibna inaad taabato afka, sanko, ama indhaha.

Saraakiisha caafimaadka gobolka iyo deegaanku waxay sheegeen in fayrasku uu bulshada dhex wareegayo lana filayo in tirada uu haleelay kordhaan. Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurka (CDC) ee Maraykanka waxay sheegeen in COVID-19 uu aad u gudbo marka qofku astaamaha leeyahay, laakiin sidoo kale uu gudbi karo kahor astaamuhu inayna muuqan. CDC waxay ku talisay tallaabooyin si loo xadido faafidda cudurka ee bulshada, oo ay kujirto xadidaad dhacdooyinka iyo kulamada ah.

Tirada kiisaska COVID-19 ayaa sii korodhay Oregon. Maarso 8, 2020, markii aan ku dhawaaqay xaalad degdeg ah, waxa jiray 14 kiis oo qiyaas ahaa ama la xaqiijiyey Oregon. Ilaa iyo maanta, waxaa cudurka laga helay ugu yaraan 1,785 waxaana u dhimatay 70 qof.

Muddo yar gudahood, COVID-19 si dhakhso ah ayuu u fiday. Si loo yareeyo faafitaanka COVID-19 gudaha Oregon, iyo si loo ilaaliyo caafimaadka iyo nololsha dadka reer Oregon, gaar ahaan kuwa halista ugu sarreeya leh, waxaan ogahay in dhaqangelinta degdeg ah ee tallaabooyin dheeri ah loo baahan yahay si loo ilaaliyo caafimaadka, badbaadada, iyo degganaanta maaliyadeed ee dhammaan dadka reer Oregon.

Xaaladda degdegga ah ee COVID-19 ayaa waxay dad badan oo reer Oregon ah ku keentay shaqo lumin iyo dhibaatooyin dhaqaale.

Dadka reer Oregon ee u qalma ayaa dhowaan heli doona lacagaha dib loo soo celiyay ee sharciga CARES. Lacagahan waxaa u baahan dadka reer Oregon ee nugul si ay uga caawiyaan bixinta kharashka guryahooda, cunadooda, caafimaadkooda iyo baahiyaha kale ee daruuriga ah. Amarkan Fulinta ah wuxuu lagama maarmaan u yahay xaqiijinta in lacagahan loo isticmaali karo in lagu bixiyo kharashyada baahiyada hadda jira ee dadkan.

**AMARKA FULLINTA EE LAMBARIKIISU YAHAY. 20-18  
BOGGA SADDEX**

**HADDABA SIDAAS DARTEED, WAXAA HALKAAN LAGU JAHEEYAY  
OO LAGU AMRAY IN:**

Iyada oo la raacayo sharciyada ORS 433.441, ORS 401.168, ORS 401.175, ORS 401.188, iyo ORS 401.192, waxaan bixinaya tilmaamaha soo socda, kuwaas oo loogu talagalay in xukunka lacag-xayirida laga ilaaliyo lacagaha dib loo soo celiyay ee Sharciga CARES ee la siinayo shaqsiyaadka. Sababta tani loo sameynaya waa in dadka reer Oregon ay lacagahan u adeegsadaan inay ku bixiyaan kharashaadka guryahooda, cunadooda, caafimaadkooda iyo baahiyada kale ee daruuriga ah inta lagu jiro xiliga xaalada degdegga ah ee COVID-19.

1. Qeexitaano.

- a. \*Muddada xaaladda degdegga ah ee COVID-19” waxay ka dhigan tahay muddada uu gudaheega xaaladda degdegga ah ee COVID-19 ee uu ku baaqay Amarka Sare 20-03 uu dhaqangalay, oo ay kujiraan wixii korodh lagu sameeyey xaaladdaas degdegga ah.
- b. “Hay'ad/Wakaalad maaliyadeed” waxay leedahay macno la mid ah midka ku qeexan ORS 18.600 (7).
- c. “Sharciga CARES” waxaa loola jeedaa “Sharciga Kaalmada iyo Caawinta Dhaqaale ee ku aadan Korona Fayraska (Coronavirus Aid, Relief, and Economic Security Act”, H.R. 748) ee uu meel mariyay Golaha Baarlamaanka Maraykanka uuna saxiixay Madaxweynaha Maraykanka taariikhda markay ahayd 27-da bishii Maarso, 2020.
- d. “Dib-u Soo Celinta Lacagta” waxaa loola jeedaa lacagta ay Dowladda Maraykanka siisay shakhsiyaadka u qalma taasi oo ah lacag aan ka badneyn \$1,200 qofkiiba (ama \$2,400 haddii ay yihiin shakhsiyaad si wadajir ah u wada xareeya canshuur celinta), iyo \$500 oo la siinayo cunug kasta oo u qalma, iyadoo la raacayo Qaybta 2201 (a) ee Sharciga CARES.

2. Lacagta Dib Loo Soo Celiyay ee Sharciga CARES ayaa Mamnuuc ah in La-xayiro. Muddada lagu jiro xaaladda degdegga ah ee COVID-19:

- a. Dhammaan Lacagaha Dib Loo Soo Celiyay ee Sharciga CARES ee la siiyay shakhsiyaadka ayaa laga dhaafayaa "xukunka lacag-

xayirida" iyadoo la raacayo sida ereygaas ugu qeexan yahay ORS 18.602 iyo sida loogu adeegsaday Cutubka 18-aad ee sharciga ORS, haddii aan sharaxaad kale lagu bixin Amarkan Fulinta ah ama hagitaan la soo saaray iyadoo la raacayo Amarkan Fulinta ah.

**AMARKA FULLINTA EE LAMBARIKIISU YAHAY. 20-18  
BOGGA AFAR**

- b. Dhammaan Lacagaha Dib Loo Soo Celiyay ee Sharciga CARES ee laga dhaafay xukunka lacag-xayirida iyadoo la raacayo Amarkan Fulinta ah iyo hagida la xiriirta ayaa weli laga reebi/dhaafi doonaa marka lagu shubo koonto hay'ad maaliyadeed, si lamid ah lacagaha kale ee lagu qeexay ORS 18.348 (3).
  - c. Markii la helo Ogeysiiska ama Amarka Xayirida Lacagta, hayadaha maaliyadeed waa ina ula dhaqmaan dhammaan Lacagaha Dib Loo Soo Celiyay ee Sharciga CARES si la mid ah lacagaha macaashka oo ay bixiso dawlada fadaraalka si ay ugu hoggaansamaan waajibaadkooda uu dhigayo sharciga ORS 18.784, in xukunka lacag-xayirada uu leeyahay bayaankan soo socda mooyee: "Xukunka Lacag-xayirida Waxaa Loo Soo-saaray in lagu Uruuriyo Lacag Dambiyeed oo Dib Loo Soo Celinayo ama Xukun Maxkamadeed oo Ku Saleysan Dambi. " Markii laga jawaabay xukun lacag-xayiraad oo wato bayaankan, hay'adda maaliyadeed waa inay ula dhaqmaan Lacagta Dib Loo Soo Celiyay sidii mid la xayiri karo.
3. Hagitaan. Xeer Ilaaliyaha Guud iyo Waaxda Cadaalada ee Oregon waa inay bixiyaan hagitaan dheeri ah oo ku saabsan tilmaamaha lagu xusay gudaha Amarkan Fulinta ah, markii loo baahdo.
  4. Ka reebitaanada. Marka laga reebo baragaraafka 2-aad ee Amarkan Fulinta ah:
    - a. Lacagaha Dib Loo Soo Celiyay ee Sharciga CARES ayaa lagu dabaqi doonaa xukun lacag-xayiraad kasta oo lagu uruurinayo: (a) magdhow uu xukun ficil dambiyeed uga baahan ya in eedaysanaha uu bixiyo; ama (b) magdhow laga rabo qof uu xukun madani ah ku xukumay fal dambiyeed, waa haddii xukunka madaniga ah uu ku saleysan yahay isla xaqiiqooyinka xukunka maxkamada.
    - b. Xukunka lacag-xayirida ee la soo saaray iyadoo la raacayo baragaraafka 4(a) ee Amarkan Fulinta ah waa inuu lahaadaa bayaanka soo socota: "Xukunka Lacag-xayirida Waxaa Loo Soo-saaray in lagu Uruuriyo Lacag Dambiyeed Dib Loo Soo Celinayo ama Xukun Maxkamadeed oo Ku Saleysan Dambi. "

- c. Xukummada ku xusan cutubka 4(a) ee Amarkan Fulinta ah ka sokow, Xeer Ilaaliyaha Guud ayaa qeexi kara xukuno kale oo lagu soo aruurin karo lacagaha dib u soo celinta Sharciga CARES ee la xayiray, iyada oo loo marayo hagd la bixiyay iyadoo la raacayo baragaraafka 3-aad ee Amarkan Fulinta ah.



**AMARKA FULLINTA EE LAMBARIKIISU YAHAY. 20-18  
BOGGA SHANAAD**

Amarkan Sare waxa la soosaaray iyadoo la eegayo awoodda ay Badhasaabka siiyeen ORS 401.165 to 401.236. Sida ay sheegayso ORS 401.192(1), amarada ku qoran Amarkan Sare waa inay noqdaan qaar si buuxda u dhaqangala, waana in wixii shuruuc, xeerar iyo amaro jira la hakiyo ilaa iyo xadka ay ka hor imanayaan shaqada awoodaha xaaladaha degdegga ah ee Badhasaabka.

Amarkan Fulinta ah wuxuu dhaqan galaa isla markaaba, wuxuuna dhaqan galayaa ilaa uu ka joojiyo Barasaabka Gobolka.

Waxaa lagu sameeyay Salem, Oregon, maalinta 17-ka Abriil, 2020.

---

Kate Brown  
GUBANATORE

CADDAYN:

---

Bev Clarno  
XOGHAYAHA ARRIMAHA DIBADDA